

JADEECO

JADEECO WA CUDUR AAD U DARAN

Jadeecado waa cudur aad u daran oo keena finan iyo qandho.

Jadeecadu waa cudur aad u faafa. Waxay ku faafta marka qof qaba jadeeco qaba uu ku neefsado, qufaco ama uu hindhiso.

Qof walba oon talaalneeyn wuxuu halis badan ugu jiraa ineey ku dhacdo jadeeco.

Jadeecadu waxay noqon kartaa halis, gaar ahaan dhallaanka iyo carruurta yaryar. Waxeey keeni kartaa barar maskaxda ah iyo/ama infekshinyo/cudur sambabka. Maraar an aad u badneen, waxay sababi kartaa dhimasho.



cdc.gov

SIDA UGA WANAAGSAN AAD JADEECADA KAGA DIFAACI KARTO QOYSKAAGA WAA TALLAALKA.

Dhakhatiirta waxaay kutaliyan ay ciyaalka oo dhan qaatan tallaalka MMR.

Tallaalka MMR waa ammaan wuu na kufiicanyahay hortagga jadeecada. Wuxuu kale uu difaac u yahay qanjo bararka iyo qaamo qashiir.

Qaadashada tallaalka MMR (ka) wuxuu ka Qatar yaryahay halista xanuunka jadeecada.

Ciyaalka badankooda dhib kama soo gaarto tallaalka. Saameynta inta badan ka soo gaarta weey yartahay mana sii daba dheeraato, sida qandho finan kooban iyo dhuun xanuun.



TALLAALKA MMR MA KEENO DHAKAAKAHA "AUTISM"

Majiran daraasaddo muujinaya inuu xiriirka dhaxeeyo dhakaakaha "autism" iyo tallaalka MMR(ka). Arintan waxaa si taxadar leh u darsay(baaray) dhakhatiir iyo sayniisteyaal badan dunidda oo dhan.

Sayniisteyaasha waxaay darasseeyeen wixii ay ciyaalka ka qaadan dhakaakaha "autism". Intooda badan saynisyahnadu waxeey isku raacsanyihiin in xanuunka ootismka inta badan yahay natiijooyin isku darsamay oo ka kooban firka qoyska iyo dhacdooyin dhacay dhalmada ka hor ama ka gadaal. Waxaa ka mid noqon kara dhacdooyinkan da'da labada waalid xilliga dhalmada, xanuuno hooyada ku dhacay markeey uurka lahayd, ama dhibaatooyin dhacay xilligii dhalmada. Waxaa sidoo kale ay daraasseeyeen xiriirada ka daxeeya cudurka dhakaakaha autism iyo degaanka u qof deganyahay.

Dhakhtarkaada weydii haddii aad su'ala ka qabtid wax kusaabsan jadeeco, tallaalka MMR ama dhakaakaha "autism."

Wixii Macluumaad dhareead ah:

www.doh.wa.gov/measles

<http://kingcounty.gov/health/measles>



Public Health
Seattle & King County



Washington State Department of
Health

MAXAA SAMEYN KARTAA HADDII AAD U MALEYSO IN AY JADEECO KUGU DHACDAY

Calaamadaha jadeecada iyo sida ay u faafto

Jadeecadu waxaay inta badan ku bilaabataa qandho aad u sareysa, qufac, diif, iyo indho casaan, ilin. Kadib 3-5 maalmood, finan ayaa inta badan ku bilaawda wajiga oona ku faafa qeybaha kale ee jirka.

Dadka kale ayaa ka qaadi karo jadeeco haddii aad leedahay calaamadaha. Waxaad tahay cudur-faafiye ilaa ay finanka ka dhamaadan.

Waxaad jadeeco ka qaadi karta haddii aad qol la gasho oo qof jadeeco qabo. Fayriska jadeecada wuxuu ku haraa hawada muddo dhan ila labo sacaadood kadib marki qofku ka tago qolka.

Soo wac dhakhtarkaada ama rugta caafimaad haddii aad aragtid calaamadaha.

Dhakhtarkaada ama rugta caafimaadka ayaa kuu sheegi doona haddii aad u baahan tahay in aad timaatid.

Jadeecadu waa cudur u faafa si aad ah waxaadna ku daaran kartaa qofka jooga qolka sugidda. Waa muhiim in aad dhakhtarkaada ama rugta caafimaad usheegtid haddii aad isku aragtid calaamadaha jadeeco inta aad tagin **kahore**. Waxaay ku siin doonan tilmaamaha ku saabsan wixii laga raba si aadan u faafin jadeecada.

Guriga joog haddii aad qabto jadeeco

Waa muhim in aadan ku faafin jadeecada dad kale.

Guriga jog haddii aad qabto jadeeco. Ha aadin dugsiga(iskoolka), shaqada, dukaanka, ama guriga dad kale.

Marti yeeyan kuugu imman gurigaaga haddii aad adi ama ciyaalkada qabo qandho mise finan.

Wixii Macluumaad dhereead ah:

www.doh.wa.gov/measles

<http://kingcounty.gov/measles>